

OGEYSIIS: FOOMKA WAXAA LOO ADEEGSAN KARAA MACLUUMAAD AHAAN KALIYA

Foomkan waxaa loogu talo galay macluumaad ahaan kaliya mana aha kan la doonayo in aad maxkamadda ka diiwaan gelisaan. Dhamaan foomamka aad maxkamadda u soo gudbineysaan waa in ay yihiin kuwa rasmiga ah ee ku qoran afka Ingiriisiga.

GOBOLKA MAINE

Dacwoodaha _____
 Qof ahaan u diiwan geliyey ama wakiil ka ah: _____
 ka wakiil ah: _____

MAXKAMADDA DEGMADA
Goobta ay ku taal _____
Lambarka Gal Dacwadeedka _____

Ka soo horjeeda

Eedeysanaha _____
 ama ka wakiil ah: _____

**MAXAKAMAD UGA YEERID
AMARKA KALA BADBAADINTA**

KU SOCOTA EEDEYSANAHA

Dacwooduhu waxaa uu bilaabay codsasho amar kala badbaadin ee ku saabsan dhibka/xadgudubka aad u geysatay oo liddi kugu ah. Haddii aad dooneyso in aad ka hortimaado amarkaas, adiga ama qareenkaaga waa in aad hortimaadaan maxkamadda taariikhdu marka ay tahay _____
Saacaddu marka ay tahay _____ subaxnimo/galabnimo. Maxkamaddu waxa ay ku taalaa:

Waqtigaas waxaa si buuxda loo dhagaysan doonaa cabashada uu soo gudbiyey dacwoodaha. **DHINACYADA DACWADU U DHAXEYSO WAA IN AY U DIYAARGAROobaan IN AY SOO BANDHIGAAN WIXII CADDEYMO AH OO LA XIRIIRA DACWADOODA.**

DIGNIIN MUHIM AH: HADDII AADAN IMAAN MAXKAMADDA WAQTIGA KOR LAGU SOO SHEEGAY, AMA WAQTI KASTA OO MAXKAMADDU AY SIDAAS KUGU WARGELISAY, AMARKA AY MAXAKAMADDU SOO SAARTAA ADIGA OO KA MAQNAADAY OO DHINACA KALE AY UGU OGALAATO WAXYAABIHII AY CODSADEEN WAXA UU DHAQANGAL YAHAY MUDDO LABA SANO. JABINTA AMARKAAS LA JABIYO WAXA AY KEENI KARTAA IN LAGU QAADO FAL DAMBIYEED DARAJADIISU TAHAY XARAFKA D OO AH IN AAD HOR ISTAAGTAY HAWSHA MAXKAMADDA. WAXA AAD MAXKAMADDA KA HELI KARTAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN DACWADAHA DHIBKA/XADGUDUBKA.

(Shaabadda Maxkamadda)

Taariikh _____

Xoghaynta _____

Magaca iyo Cinwaanka Qareenka Dacwoodaha

ADEEGGA GAARSIINTA

_____, SS

Taariikhdu markii ay ahayd _____ saacadduna ahayd subax/galab, waxa aan gaarsiiyey codsiga eedeysanaha ee lagu baabi'inayo/wax laga bedelayo/lagu darayo ama laga dhimayo dacwoodaha _____
aniga oo nuqul codsigaas ka mid ah gacanta kaga saarey goobta: _____

(goobta lagu gaarsiiyey codsiga)

Sarkaalka Gaarsiiyey

Sarkaalka Gaarsiiyey

SARAAKIISHA CIIDAMADA NABADGELYADA: Maxkamadda ku soo celi dacwad uga yeerista asalka ah adiga oo ku soo diraya cinwaanka asalka ah.